

SU'AALAHAA BAARITAANKA

Qaybta 1-aad: Su'aalaha Baaritaanka Tallaalka Carruurta

Tilmaamaha buuxinta Qaybta 1 & 1b: Fadlan goobaab jawaabta su'aal kasta haddii aad dooranayso in Waaxda Caafimaadka Dadweynaha ee Degmada Dakota uu tallaaf siiyo ilmahaaga. [Haddii tani aysan khuseyn, fadlan u gudub Qaybta 2.](#)

Haa	Maya	Ilmuhu maanta qandho ama xanuun ma qabaa (qandho 100.5 ama ka badan? Hadday haa tahay, sharax:
Haa	Maya	Ilmuhu ma leeyahay wax xasaasiyad ah oo ku aadan daawooyinka, cuntada (oo ay ku jiraan ukunta), ama latex? Hadday haa tahay, liis garee:
Haa	Maya	Ilmuhu ma la kulmay falcelin daran kadib markii la tallaalay, oo ay ku jiraan tallaalka hargabka ama COVID-19? Hadday haa tahay, sharax:
Haa	Maya	Ilmaha, walaalka bukaanka, ama waalidka bukaanka ma la kulmeen suuxdin, ama dhibaatooyin kale oo habdhiska neerfaha ah? Hadday haa tahay, liis garee:
Haa	Maya	Ilmuhu ma qabay cudurka busbuska? Haddii ay haa tahay, sheeg taariikhda saxda ah
Haa	Maya	Ilmuhu ma qabaa dhibaatooyin caafimaad oo daba-dheeraada, sida cudurrada sambabada, macaanka, neefta ama cillad dhiig? Hadday haa tahay, liis garee:
Haa	Maya	Keliya loogu talagalay dhallaanka: Ma lagu sheegay in bukaanku qabo isku maranka xidmaha?
Haa	Maya	Ilmuhu ma qabaa kansar, lkansarka dhiiga, HIV/AIDS, ama dhibaato kale oo ku saabsan habdhiska difaaca jirka?
Haa	Maya	3-dii bilood ee la soo dhaafay, ilmuhu ma qaatay daawooyin saameeya habdhiska difaaca jirka, sida prednisone, steroids, daawooyinka ka hortagga kansarka, xubna xanuunka, cudurka Crohn's, canbaar; ama daaweynta shucaaca? Qeex:
Haa	Maya	Ilmuhu waligii ma qaaday cudurka Guillain-Barre?
Haa	Maya	Ilmuhu ma lagu shubay dhiig/maadooyinka dhiigga, ma lagu tallaalay xubin, globulin-ka difaaca jirka (gamma), ama daawo ka hortagga fayraska sannadkii la soo dhaafay? Hadday haa tahay, sharax:
Haa	Maya	Ilmaha waligii ma laga helay xaalad wadne (myocarditis ama pericarditis) ama ma qabay Cudurka Bararka Qaybaha Badan oo Jirka ah (MIS-C) kadib markii uu qaatay caabuq ama tallaalka COVID-19? Hadday haa tahay sharax:
Haa	Maya	Ilmuhu ma leeyahay taariikhda thrombosis, thrombocytopenia (TTS) ama dhiig-xinjirowga uu keeno Heparin (HIT)
Haa	Maya	Ilmuhu ma qaatay wax tallaaf ah 4-tii toddobaad ee la soo dhaafay? Hadday haa tahay, liis garee:
Haa	Maya	Ilmaha ma laga qaaday baaritaanka maqaarka ee qaaxada (Mantoux) 3-dii maalmood ee la soo dhaafay ama ma qorsheynayaa inuu maro baaritaan 4-ta toddobaad ee soo socda?
Haa	Maya	Macaamiisha dheddigga ah: Bukaanku hadda ma uur ayay leedahay ama ma qorsheynaysaa inay uur yeelato bisha soo socota?
Haa	Maya	Ilmuhu ma qorsheynayaa inuu u safro meel ka baxsan Mareykanka 3-da bilood ee soo socota?

Qaybta 1b: Su'aalaha Baaritaanka Carruurta

Su'aalaha Baaritaanka Hargabka FluMist (Sanka): Waa inaad tahay 2-49 sano jir oo aadan uur **LAHAYN**.

[Haddii tani aysan khuseyn, fadlan u gudub Qaybta 2.](#)

Haa	Maya	Ilmuhu ma qabaa xaalado caafimaad oo daba-dheeraada, oo ay ku jiraan sonkorowga, neefta, dhibaato dhanka dhiiga ah, cudurrada wadnaha, cudurrada sambabada, cudurrada kelyaha, khalkhalka neerfaha, ama cudurrada beerka?
Haa	Maya	Ilmuhu ma qabaa kansar, leukemia, HIV/AIDS, ama dhibaato kale oo ku saabsan difaaca jirka; ama, 3-dii bilood ee la soo dhaafay, ma qaatay daawooyin saameeya habdhiska difaaca jirka, sida prednisone, steroids kale, ama daawooyin lagu daweyo xubna xanuunka, Crohn's disease, psoriasis, ama daawooyinka ka hortagga kansarka; ama ma leeyahay daaweyn shucaac ah?
Haa	Maya	Ilmaha da'diisu u dhaxayso 2 ilaa 17 sano ma qaadanayaa daaweynta asbiriin ama daaweynta asbiriin ku jirto?

SU'AALAHAA BAARITAANKA

Haa	Maya	Ilmuhu ma yahay ilmo da'diisu u dhaxayso 2 ilaa 4 sano, 12-kii bilood ee la soo dhaafayna ma wajahay xaalad xiiq ama neef?
Haa	Maya	Ilmuhu ma qaadanayaa daawooyinka fayraska ka hortaga ee hargabka (sida Relenza ama Tamiflu)?
Haa	Maya	Ilmuhu ma qaatay tallaalada MMR, varicella, MMRV, shingles ama indho-caseeyaha 4-tii toddobaad ee la soo dhaafay?
Haa	Maya	Ilmuhu ma leeyahay habdhiska difaaca jirka oo daciif ah, mise waxaad filaysaa inaad si dhow ula xiriirto qof habdhiska difaaca jirkiisu uu si xun u dhaawacmay iyo/ama uu ku jiro go'doon ilaalin ah?

Qaybta 2-aad: Su'aalaha Baaritaanka Tallaalka Dadka Waaweyn

Tilmaamaha buuxinta Qaybta 2 & 2b: Haddii aad tahay 18 sano jir ama ka weyn iyo/ama qof mas'uul sharci ah ama wakiil sharci ah oo macmiilka ah, fadlan goobaab jawaabta su'aal kasta haddii aad dooranayso in Waaxda Caafimaadka Dadweynaha Degmada Dakota uu adiga iyo/ama macmiilka siiyo tallaallo.

Haa	Maya	Ma qabtaa maanta qandho ama xanuun (qandho 100.5 ama ka badan)? Hadday haa tahay, sharax:
Haa	Maya	Xasaasiyad ma ku qabtaa daawooyinka, cuntada (oo ay ku jiraan ukunta), ama latex? Hadday Haa tahay, liis garee:
Haa	Maya	Ma ka qaaday xasaasiyad daran tallaalka kadib, oo ay ku jiraan hargabka iyo tallaalka COVID-19? Hadday Haa tahay, sharax:
Haa	Maya	Ma qabtaa qallal ama dhibaato maskaxeed ama habdhiska neerfaha ah? Hadday haa tahay, liis garee:
Haa	Maya	Ma qabtaa taariikhda cudurka busbuska? Haddii ay haa tahay, sheeg taariikhda saxda ah?
Haa	Maya	Ma qabtaa dhibaato caafimaad oo muddo dheer ah oo la xiriirta wadnaha, sambabada, kelyaha, ama cudurrada dheef-shiid kiimikaadka (tusaale ahaan, sonkorowga), neefta, cillad dhiig, beeryaro la'aan, qalabka lagu rakibo dhagaha, ama dheecaan ka imaanaya laf-dhabarta? Ma qadataa daaweynta asbiriin muddada dheer? Hadday haa tahay, liis garee:
Haa	Maya	Ma cabtaa sigaar? (Tallaal dheeraad ah ayaa lagu talin karaa)
Haa	Maya	Ma qabtaa kansar, kansarka dhiiga, HIV/AIDS, ama dhibaato kale oo ku saabsan difaaca jirka?
Haa	Maya	3-dii bilood ee la soo dhaafay, ma qaadatay daawooyin saameeya habdhiska difaaca jirka, sida prednisone, steroids kale, ama daawooyinka ka hortagga kansarka; daawooyinka lagu daweeyo xanuunka arthritis-ka lafo-goysyada, cudurka Crohn, ama canbaarta; ama ma qaadatay daaweyn shucaac ah?
Haa	Maya	Waligaa ma kugu dhacay cudurka Guillain-Barre Syndrome?
Haa	Maya	Miyaa lagugu shubay dhiig/maadooyinka dhiigga, tallaal xubinta jirka, globulin-ka difaaca jirka (gamma), ama daawo ka hortagta fayraska sannadkii la soo dhaafay? Hadday Haa tahay, sharax:
Haa	Maya	Waligaa ma lagaa helay xanuunka wadnaha (myocarditis ama pericarditis) ama ma kugu dhacay Cudurka Bararka Nidaamyada Badan (MIS-A ama MIS-C) kadib markii aad qaaday caabuq ama aad qaadatay tallaalka COVID-19?
Haa	Maya	Ma lahayd taariikhda thrombosis, thrombocytopenia (TTS) ama dhiig-xinjirowga uu keeno Heparin (HIT)
Haa	Maya	Ma qaadatay wax tallaal ah 4-tii toddobaad ee la soo dhaafay? Hadday haa tahay, liis garee:
Haa	Maya	Ma qaadatay baaritaanka maqaarka ee qaaxada (Mantoux) 3-dii toddobaad ee la soo dhaafay ama ma qorsheyneysaa inaad mid qaadato 4-ta toddobaad ee soo socda?
Haa	Maya	Haweenka: Hadda uur ma leedahay ama ma qorsheyneysaa inaad uur yeelato bisha soo socota?
Haa	Maya	Ma qorsheyneysaa inaad u safarto meel ka baxsan Mareykanka 3-da bilood ee soo socota?

Qaybta 2b: Su'aalaha Baaritaanka Hargabka FluMist (Sanka) ee Qofka wayn:

Waa inuu jiraa da'da 2-49 sano oo **UUSAN** uur lahayn

Haa	Maya	Ma qabtaa wax xaalado caafimaad oo daba-dheeraada, oo ay ku jiraan sonkorowga, neefta, dhiig-baxa, cudurrada wadnaha, cudurrada sambabada, cudurrada kelyaha, khalkhalka neerfaha, ama cudurrada beerka?
-----	------	--

SU'AALAHHA BAARITAANKA

Haa	Maya	Ma qabtaa cudurka Guillain-Barré Syndrome, kansar, kansarka dhiiga, HIV/AIDS, ama dhibaato kale oo ku saabsan difaaca jirka; ama, 3-dii bilood ee la soo dhaafay, ma qaadatay daawooyin saameeya habdhiska difaaca jirka, sida prednisone, steroids kale, ama daawooyin lagu daweeyo xanuunka tufta, cudurka Crohn's, baraska, ama daawooyinka ka hortagga kansarka; ama ma leedahay daaweyn shucaac ah?
Haa	Maya	Ma qaadataa daawooyinka fayraska hargabka (sida Relenza ama Tamiflu)?
Haa	Maya	Ma qaadatay tallaalada jadeecada, qaamo-qashiir iyo rubellada, busbus, MMRV, furuq ama indho-caseeyaha 4-tii toddobaad ee la soo dhaafay?
Haa	Maya	Ma leedahay habdhiska difaaca jirka oo daciif ah, mise waxaad filaysaa inaad xiriir dhow la yeelato qof habdhiska difaaca jirkiisu uu si xun u dhaawacmay oo ay tahay inuu ku jiro go'doomin ilaalin ah?